Alberta

**War** saxaafadeed

# Ka dhigista korontada mid qiimo jaban

Abriil 18, 2024 Weydiimaha saxaafadda

## Dowladda Alberta waxay sii jabinaysaa sicirka korontada ayada oo dadka reer Alberta ka ilaalinaysa kor u kaca qiimaha kana caawinaysa inay la socdaan khiyaaraadka u furan.

Si ay dadka reer Alberta uga ilaaliso in sicirka korontada ee caadiga ah uu ku kaco, dowladda Alberta waxay ku tala jirtaa inay soo saarto shuruuc iyo xeerar cusub dayrtan si ay u raqiisiso qiimaha korontada ayada oo yaraynaysa isbedbedelka qiimaha sidoo kalena kordhinaysa ku tartamidda suuqa korontada. Sicirka korontada ee aasaasiga ah ayaa la dajin doonaa ayada oo koronto bixiye walba oo dajin doono labadii sannoba hal mar. Arintani waxay si weyn hoos ugu dhigaysaa kororka uu qiimaha korontadu ku kordhaayo dadka reer Alberta ee aan awoodin inay saxiixaan heshiisyada qiimaha sare leh (competitive contract), oo ay ka mid yihiin dadka degen miyiga Alberta oo laga yaabo inuusan khiyaar kale u furnayn, iyo kuwa uu hooseeyo dhibcaha kaarkoodu ama ay haystaan dhibaatooyin dhaqaale oo kale sida dadka da’da ah iyo bulshada kale ee nugul.

“Dadka reer Alberta ma ahan inay ka welwelaan eegista biilashooda bil walba. Kharashaadka korontada ee isbedbedelaya ayaa ku adkaynaya qoysas fara badan inay qorsheeyaan miisaaniyadda qoyskooda sidaa darteedna ma ogolaan karno in dadka reer Alberta ku wareeraan biilasha korontada kuna sababaan dhibaatooyin dhaqaale. Waxaanu balan qaadnay inaan wax ka qabanano awoodis la’aanta sii kordhaysa ee qiimaha korontada waxaana qaadaynaa talaabooyinkii ugu horeeyay ee aan arintaas ku samayn lahayn, ayadoo kuwo kalenaa soo socdaan.”

*Danielle Smith, Gudoomiyaha Alberta*

Magaca sicirka korontada ee rasmiga ah, Regulated Rate Option (RRO), waa mid dadka marin habaabinaya maadaama ereyga ‘regulated’ (‘waa la maamulaa’) uu u wareerinayo macaamiisha wuxuuna moodsiinayaa in sicirka ay dowladdu ilaalinayso. Ayada oo lagu salaynayo talooyinka RRO Working Group, dowladda Alberta waxay ku tala jirtaa inay soo saarto shuruuc dayrtan si ay magaca uga badasho sicirka rasmiga ah ee korontada uguna badasho Rate of Last Resort. Marka magaca

loo badalo Rate of Last Resort, isticmaaleyaashu waxay awoodi doonaan inay si wanaagsan u fahmaan sicirka ay bixinayaan waxayna ku dhiirigalinaysaa inay raadsadaan xulashada ugu wanaagsan.

“Aqoontu waa awood, dadka reer Albertana waxay u baahan yihiin inay ogaadaan xulashooyinkooda. Biilasha korontadu waxay qaab wanaagsan ama xun u saamayn karaan miisaaniyad cariiri ah ayadoo santi walbaa la xisaabinayo, taasoo ah sababta aan uga ilaalinayno dadka ay ku yaryihiin xulashooyinku sicirada qiimaha korontadu ee sida lama filaanka ah u kacaaya. Arintaanu waxay sidoo kale nolosha u jabinaysaa dhammaanba dadka reer Alberta ayada oo hoos u ridaysa qiimaha adeegyada korontada iyo biyaha.”

*Nathan Neudorf, Wasiirka Sicirka iyo Adeegyada*

Marka isticmaaluhu uu diido inuu saxiixo heshiisyada qiimaha sare leh (competitive contract), waxaa waajib ku noqonaysa inuu ku iibsado korontadiisa sicirka rasmiga ah asaga oo ka iibsanaya koronto bixiyaha deegaankiisa. Si loo xaqiijiyo in dadka reer Alberta ay si wanaagsan ula socdaan xulashooyinkooda sicirka korontada, dowladda Alberta waxay ku tala jirtaa inay soo saarto shuruudo dheeraad ah oo khuseeya bixiyeyaasha korontada ee rasmiga ah. 90 maalmood gudahood marka ay adeegyadooda bixiyaan, adeegbixiyeyaasha waxaa shardi ku noqonaysa inay macaamiishooda ka xaqiijiyaan inay saxiixayaan heshiis qaali ah ama ay kusii jirayaan sicirkooda korontada ee rasmiga ah. Bixiyeyaasha waxaa sidoo kale laga doonayaa inay macaamiishooda la wadaagaan sida loo isticmaalo khayraadka Uqareenka Macmiilka Korontada. Intaa waxaa dheer, dowladdu waxay adeeg bixiyeyaasha ka doonaysaa inay xasuusiyaan xulashooyinkooda biilasha bil-laha ah.

Suuqa korontada Alberta ee lagu tartamayo wuxuu dadka reer Alberta siinayaa khiyaar ay ku kala dooran kaaraan 50 ganacsiyo oo qiimo lagu tartamayo leh kuwaas oo bixiya labadaba qiimaha go’an iyo kan isbadbadalaba. Tobanaan kun oo reer Alberta ah ayaa ka guuray sicirkii rasmiga ahaa 2023kii, kuwa wali kujirana waa inay tixgaliyaan khiyaaradooda. Dadka doonaya in laga caawiyo biilashooda korontada ama waajahaya muran kala dhexeeya adeeg bixiyahooda waa inay la xiriiraan Utilities Consumer Advocate (Uqareenka Macmiilka Adeegyada).

## Xaqiiqooyinka kooban

- Dadka reer Alberta waxay haystaan saddex xulasho oo ay kala doortaan marka ay iibsanayaan adeegyadooda korontada iyo gaaska dabiiciga ah; RRO oo rasmi ah, sicirka heshiis lagu tartamayo oo isbadabadalaya, ama heshiis lagu tartamayo oo aan isbadalayn.

    - Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sicirada adeegga, la xiriir Uqareenka Macmiilka Adeegyada ama bookho websaytkooda.
    - Gudaha Alberta, macaamiisha aan saxiixin heshiisyada qiimaha sare leh (competitive contract) waxay heli doonaan sicirka korontada ee rasmiga ah ayaga oo ka helaaya bixiyahooda RRO.
    - Sicirka korontada ee rasmiga ah waa mid hadda isbedbedelaya bilba bisha ka danbaysa asaga oo uu saamaynayo qiimaha suuqa korontada ee Alberta. Siciradaan waxaa jaangooya Guddiga Adeegyada ee Alberta (AUC), mana go'aamiso dowladdu.
- Qiyaastii 29 boqolkiiba macaamiisha deegaanka ah ayaa ku iibsada korontada sicirka rasmiga ah ee korontada.
- Qiyaastii 32 boqolkiiba macaamiisha ganacsiga ee u qalanta iyo 46 boqolkiiba macaamiisha beeralayda ah ayaa korontada ku iibsada sicirka korontada ee rasmiga ah.

## Macluumaadka la xidhiidha

- Uqareenka Isticmaalaha Adeegyada
- Qaabaynta MSA

## Wararka la xiriira

- Caawimada macaamiisha laga caawinayo korontada ee Janaayo (Diisambar 21, 2022)

## Warbaahinta kala duwan

- Daawo shirka jaraa'id

## Su'aalaha warbaahinta

### Sam Blackett

587-589-6048
Xoghayaha Saxaafada, Guddoomiyaha Xafiiska

### Ashley M Stevenson

587-357-2141
Xoghayaha Saxaafadda, Wasaaradda Qiimo Jabnaanta iyo Adeegyada